



**GO'AANADA RASMIGA AH EE KULANKA  
KULANKA GUDIGA DUGSIGA GAARKA EE BOSTON**

**03/02/2022**

Guddiga Dugsiga Boston wuxuu qabtay gaara oo shir fog 22kii Maarj, 2022 saacadu markay ahayd 5 p.m. oo ah Zoom. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah shayada hoos ku taxan, booqo [www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee](http://www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee), iimayl ugu dir [feedback@bostonpublicschools.org](mailto:feedback@bostonpublicschools.org) ama ka wac Xafiiska Guddida Dugsiyada Boston (617) 635-9014.

**SOO XAADIRAYAASHA**

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee soo xaadiray: Guddoomiye Jeri Robinson; Guddoomiye ku xigeenka Michael D. O'Neill; Stephen Alkins; Brandon Cardet-Hernandez; Lorena Lopera; Rafaela Polanco Garcia; Mr. Tran; iyo Wakiilka Ardayga Xyra Mercer.

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee Maqanaa: Midna.

**DUKUMIINTIYADA LASOO BANDHIGAY**

Ajandaha

Xogta Shirka: Febraayo 15, 2022

Codsiga Shirkadda Raadinta Kormeeraha Guud ee Soo jeedinta (RFP)

Qoraal: Xubinnimada Guddiga Raadinta Kormeeraha Guud iyo Geedi socodka Ka qaybgalka Bulshada

**FURITAANKA KULANKA**

Gudoomiye Jeri Robinson ayaashirka furay hormuud ka noqdo ballan qaadka. Marwo Sullivan ayaa dadka yeerisay. Mr. Tran wuu ka maqnaa lakiin wuxuu kusoo biiray kulanka dadweynaha ka dib kulanka sare. Mr. Cardet-Hernandez iyo Mr. O'Neill ayaa ku biiray bilawgii kalfadhiga fulinta. Dhammaan xubnaha kale ayaa joogay.

## **Kulanka fog araga ee Guddiga Dugsiga Boston Zoom**

**03/02/2022**

Ms. Robinson waxa ay ku dhawaaqday in Guddigu isla markiiba dib u dhigi doono fadhiga fulinta ujeedaduna tahay qabashada kulan istiraatiijiyad ah oo la xidhiidha gorgortanka wadajirka ah ee Midowga Macallimiinta Boston iyo in la qabto kulan istiraatiijiyad ah oo loogu diyaar garoobayo wada xaajoodka Maamulaha Dugsiyada (aan ahayn ururka shaqaalaha). shaqaalaha). Waxay tiri Gudigu waxa uu kusoo noqon doonaa fadhiga dadweynaha 6 p.m. galabnimo

### **KU BAXAY KULANKA FULINTA**

La ansixiyay - Wicitaan duubis ah, Guddigu waxay si wada jir ah ugu codeeyeen in dib loo dhigo fadhiga fulinta ujeedada qabashada kulan istiraatiijiyad ah oo la xidhiidha gorgortanka wadajirka ah ee Ururka Macalimiinta Boston iyo in loo diyaariyo wada xaajoodka Kormeeraha Guud ee Dugsiyada (shaqaale aan ururka ahayn).

### **KU SOO NOQO SHAQAALAHA GUUD OO KU BAAQA AMARKA**

Guddoomiye Chairperson Jeri ayaa dib isugu yeeray kulanka meel fagaare ah abaare 6:25 p.m. Waxay ku dhawaaqday in Guddigu hadda ka soo laabtay fadhigii fulinta ujeedada qabashada kulan istiraatiijiyad ah oo la xidhiidha gorgortanka wada jirka ah ee Ururka Macalimiinta Boston iyo inay qabtaan kulan istiraatiijiyad ah oo loogu diyaar garoobayo wada xaajoodka Maamulaha Dugsiyada (shaqaale aan ururka ahayn)

Marwo Robinson ayaa sheegtay in kulanka caawa si toos ah looga daawanayay Zoom. Waxaa dib looga sii dayn doonaa telefeeshinka Magaalada Boston. Waxaa lasoo dhigi doonaa [bostonpublicschools.org/schoolcommittee](http://bostonpublicschools.org/schoolcommittee) iyo YouTube. Waxay ku dhawaaqday in adeegyo tarjumaad isku mar ah lagu heli karo Isbaanishka, Haitian Creole, Cabo Verdean, Vietnamese, Cantonese, Mandarin iyo Luqadda Calaamadaha Ameerikaanka (ASL). Turjubaanka ayaa is baray waxayna ku bixiyeen tilmaamo afkooda hooyo sida loo heli karo turjumaada isku mar ah iyagoo bedelaya kanaalka Zoom. Dukumentiyada kulanka oo la turjumay ayaa lasoo dhigay [www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee](http://www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee) kahor inta uusan shirka bilaaban.

### **ANSIXINTA GO'AANADA KULANKA**

La Oggolaaday - Wicitaan duubis ah, Guddigu waxay si wada jir ah u ansixiyeen qodobbada kulanka Guddiga Dugsiga ee Febraayo 15, 2022.

### **WARBIXINTA RAADINTA KORMEERAHA GUUD**

Ms. Robinson wuxuu bixiyey warbixinta nidaamka raadinta kormeeraha guud. Madaamoo Mayor Wu, Kormeeraha Guud Cassellius iyo Gudoomiye Robinson si wadajir ugu dhawaaqeen tagitaanka Kormeeraha Guud Juun 2022, kooxahooda ayaa ula shaqeynaayey si balaadhan si ay

**Kulanka fog araga ee Guddiga Dugsiga Boston**  
**Zoom**

**03/02/2022**

u dejiyaan talaabooyinka xiga oo si dhow ulasoo xidhiidhaayey iyagoo sidoo kale hubinaayey in hawlaha dugsiga degmada si fiican loo maamulay.

Waxay dejisay ujeedooyinka muhiimka ee Gudiga ee kulanka: dibu eegtay heshiiska kalasaarida ee u dhaxeeya Gudiga Dugsiga Boston iyo Dr. Cassellius; waxay dibu eegtay Dalabyada Codsiga (RFP) ee shirkada raadinta; waxay dibu eegtay sameynta Gudiga Raadinta Kormeeraha Guud waxayna kala doodday talaabooyinka xiga ee horumarinta xubinimada; iyo waxay dibu eegtay jadwalka hanaanka hawlgalka bulshada ee soo socda.

Ms. Robinson waxay uga mahadcelisay Kormeeraha Guud Cassellius hogaankeeda iyo dadaalkeedii mudadii sanadihii lasoo dhaafay oo aad u adkaa.

*Heshiiska Kalasaarida ee Kormeeraha Guud:* Todobaadadii lasoo dhaafay, Golaha Wadashaqeynta Magaalada Boston iyo gudoomiye Dr. Cassellius ayaa ka doodday kana xaajooday heshiisyada wadajirka ee kalasaarida. Labadaba Magaalada Boston iyo Dr. Cassellius waxay gaadheen heshiis oo caawa Gudoomiye Robinson waxay weydiin doontaa Gudigu inay caawa u ogalaadaan inay saxeexo heshiiska kalasaarida iyadoo matalaysa Gudiga Dugsiga.

Ms. Robinson waxay dejisay shuruudaha heshiiska. Shuruudihii waxay waafaqsan yihiin heshiisyadii kalasaarida ee hore ee u dhaxeeyey Gudiga Dugsiga iyo kormeerayaasha guud ee tagay. Heshiisku wuxuu waafaqsan yahay shuruudaha qandaraaska shaqaaleysiinta Kormeeraha Guud iyo sharciga gobolka mana siinaayo wax ka badan waxa qandaraaska Kormeeraha Guud iyo sharciga gobolku u baahan yahay.

Shuruudaha heshiiska waxa ku jira, Dr. Cassellius inuu heli doono mushahar qandaraas hal sano oo wadartiisu tahay \$297,138.00. Waxay sidoo kale heli doontaa \$16,900 lacag bixin ah korodhka mushaharka ugu yar ee qandaraasku u baahan yahay oo aanay helin mudadii labadii sanee u danbeeyey. Dr. Cassellius waxay sidoo kale heli doontaa lacagta u ururtay lakiin aanay isticmaalin wakhtiga fasaxa ee tagitaankeeda. Lacagahani waxay waafaqsan yihiin waxa loo baahan yahay iyadoo la raacayo shuruudaha qandaraaska shaqaaleysiinta iyo sharciga gobolka. Ms. Robinson waxay tiri heshiiska kalasaaridu waa cadaalada dhamaan dhinacyada, waxayna siisay Dr. Cassellius waxa sharciyan ay leedahay marka loo eego qandaraashkeeda shaqaaleysiinta iyo sharciga gobolka, wuxuuna waafaqsan yahay heshiisyada kalasaarida hore ee kormeerayaasha gud ee tagay.

Dr. Alkins wuxuu uga mahadceliyey Kormeeraha Guud Cassellius dejinta sees adag wuxuuna ka hadlay muhiimada dibu dhisida kalsoonida qoysaska.

Mr. Cardet-Hernandez taxliijiyey faalooyinka Dr. Alkins ee dibu dhisida kalsoonida ka dib tagitaanka kormeerayaasha guud ee nidaamka. Wuxuu xoojiyey muhiimada ka turjumida casharada la bartay iyo ku darida casharadadaasi heshiiska shaqaaleysiinta kormeeraha guud ee xiga.

Mr. O'Neill ayaa uga mahadceliyey golaha wadashaqeynta Magaalada shaqadooda heshiiska.

Mr. Tran ayaa uga mahadceliyey Kormeeraha Guud Cassellius adeegeeda, oo amaanay hogaankeeda.

03/02/2022

### *Shirkada Raadinta RFP*

BPS waxay soo dhejiyeen RFP si ay u shaqaaleysiyaan shirkada raadinta si ay u maamusho nidaamka lagu shaqaaleysiinaayo kormeere guud oo cusub todobaadkii hore. Waxay kusoo dhejisay [bostonpublicschools.org/supt-search](https://bostonpublicschools.org/supt-search). RFP wuxuu dhigayaa baaxada shaqada la dhameystiraayo. Wakhtiga kama danbeysta ee shirkadu ku jawaabayso waa 18ka wakhtiga 12 p.m. EST. Codsiyada waxa qiimeyn doona kooxda qiimeynta RFP oo ay ku jiraan 1-2 xubnood oo Gudida Raadinta, iyo sidoo kale Al Taylor, Sargaalka Hantida Bulshada ee BPS, iyo Naveen Reddy, Maamulaha Ganacsiga ee BPS. Kooxda RFP waxay usoo gudbin doonaan falanqeynta tooda codsiyada la helay iyo xulista lagula taliyey Gudiga Raadinta ee dibu eegista. Gudiga Raadintu waxay kala talin doonaan Gudiga Dugsiga codbixinta ugu danbeysa, taasoo la qorsheeyey Abril 6keeda.

Mr. O'Neill wuxuu yiri in kharashaadka RFP laga bixin doono miisaaniyada BPS. Wuxuu yiri kharashka saxda ah waxa ka sheegi doonaa marka RFP la ogaado.

Mr. Cardet-Hernandez ayaa ku dhiiriyey kooxda qiimeynta RFP inay ku xidhnaadaan kooxda qiimeynta ee raadinta kormeeraha guud ee hore kalana doodaan casharada la bartay. Wuxuu weydiiyey inay jireen meel go'an oo kharasha raadinta. Ms. Robinson waxay tiri Gudigu waxay baadhi doonaan kharashaadka baadhitaanada hore. Mr. O'Neill waxay sharaxday in shirkadaha raadinta qaar usoo bandhigaan kharash go'an, halka qaar kale usoo bandhigaan mushaharka boqolayda oo lagu daray kharashka. Wuxuu sheegay in raadinta kormeerayaal guud oo badan wadankoo dhan ah ay hada socoto.

Dr. Alkins wuxuu codsaday waadixinta doorka hawlgalka bulshada. Mr. O'Neill wuxuu yiri in qeybta dadweynuhu muhiim tahay heerarka hore iyo danbe ee nidaamka mudada yar ee u dhaxaysa marka wareysiyo muhiim ah la qabanayo.

### *Guddiga Raadinta*

Ms. Robinson waxay sharaxday in marka la eego wakhtiga xadidan, ay soo jeedinayso gudi raadin ka balaadhan sanadadii hore si loo kordhiyo aqoonsiga jadwalo furan.

Gudiga Raadinta waxa ku jiri doona:

- Dr. Pam Eddinger, Madaxweynaha Bunker Hill Community College
- Roxi Harvey, Gudoomiyaha BPS Golaha Kalatalinta Waalidka Waxbarashada Gaarka (SpEdPac)
- Lorena Lopera, Xubin ka tirsan Gudiga Dugsiga Boston
- Marcus McNeill, Ardey ka tirsan Fenway High School
- Michael O'Neill, Gudoomiye ku xigeenka Gudiga Dugsiga Boston
- Dr. Carlina Pignato, Madaxa Dugsiga, Dugisga Hoose Dhexe Channing Elementary School ee Boston Public Schools
- Gene Roundtree, Kormeeraha Guud ee Dugsiga Sare iyo Madaxihii hore ee dugsiga Snowden High School ee Boston Public Schools

**Kulanka fog araga ee Guddiga Dugsiga Boston  
Zoom**

**03/02/2022**

- Jessica Tang, Madaxweynaha Boston Ururka Macalimiinta
- José Valenzuela, macalinka taariikhda ee Boston Latin Academy

Ms. Robinson wuxuu soo jeediyey in Gudiga Raadinta ay hogaamiyaan saddex gudoomiye: Dr. Eddinger, Ms. Lopera, iyo Marcus McNeill - macalin, waalid, iyo ardey.

*Ka Qeybgalka Bulshada*

Gudiga Raadintu waxay martigalin doonaan kulamo dhowr ah oo dhageysi fadhiyo is xiga ah.

Taariikhaha iyo wakhtiyada kulamadan dadweynuhu waxay noqon doonaan:

- Wednesday, Maarij 9keeda 6-8pm
- Salaaso, Maarij 15keeda 6-8pm
- Khamiista, Maarij 24keeda 6-8pm
- Sabti, Abril 2deeda 10am-12pm

Kulamada waxa lagu qaban doonaa Zoom, waa la duubiyaa waxaana lasoo galinayaa gabagabada kulankasta, waxaana ku jiri doona turjumaad toosa oo dhamaan luuqadaha BPS. Xubnaha dadweynaha ayaa iska diwaangali kara iyagoo RSVPing onlaayn ah [bostonpublicschools.org/supt-search](https://bostonpublicschools.org/supt-search). Waxa intaasi dheer, xubnaha dadweynaha ayaa ka gudbin kara cadyn qoraal iimayl: [superintendentsearch@bostonpublicschools.org](mailto:superintendentsearch@bostonpublicschools.org). Gudiga Dugsiga ayaa la shuraakoobi doonta Gudiga Raadinta si loo helo siyaabo kala duwan oo lagusoo ururinaayo jawaacelinta daneeyayaasha, oo ay ku jiraan aanse lagu koobin cadeynta qoran iyo adeegyada onlaaynka, oo loo turjumi doono dhammaan luuqadaha waaweyn.

Ms. Lopera ayaa weydiisay qorshayaasha xidhiidhka bulshada. Ms. Robinson ayaa tiri kulamada hore waxay noqon doonaan bilow, iyadoo ku dartay in Gudiga Raadintu qorsheyn karaan kulamo dheeriya oo ay martigaliyaan ururada bulshadu. Mr. Cardet-Hernandez ayaa soo jeediyey in fursadaha lagu bixiyo luuqadaha dhaladka iyo sidoo kale madasha ardeyda. Ms. Robinson ayaa tiri qabashada madasha ee Zoom waxay u sahli doontaa helitaanka oo wanaag ka muujisay hawlgalka xoogan.

**FAALLO GUUD EE DADWEYNAHA**

- Maria Mejia, Roxbury oo deegaan ah iyo waalid ka tirsan Blackstone Elementary School, ayaa cadeeyey horumarada miisaaniyada iyo xarumaha dugsiga.
- Nancy Lessin, Jamaica Plain oo deegaan ah kana tirsan Qoysaska BPS ee Badqabka COVID iyo MassCOSH, ayaa cadeeyey Badqabka khuseeya COVID.
- Robert Jenkins, Mattapan deegaan ah oo u doodaha bulshada, ayaa ka marag kacay shuruudaha GPA ee ciyaaraha fudud.
- Sharon Hinton, oo deegaan ah Hyde Park iyo aasaasaha Black Teachers Matter, ayaa ka marag kacay raadinta Kormeeraha Guud.
- Elise Pechter, Jamaica Plain oo deegaan ah ka tirsan MassCOSH, ayaa ka marag kacay badqabka COVID.

**03/02/2022**

- Allison Cox, Jamaica Plain oo deegaan ah iyo waalid Mission Hill K-8 School ayaa ka marag kacay dhibaatooyinka khuseeya talaabooyinka baryahan ee degmada dhanka dugsiga.
- Ruby Reyes, deegaan ah Dorchester iyo madaxa fulinta ee Isbahaysiga Cadaalada Waxbarashada Boston (BEJA), ayaa ka marag kacay miisaaniyada.
- Mike Heichman, Dorchester oo deegaan ah kana tirsan BEJA, ayaa ka marag kacay miisaaniyada iyo arimaha kala duwan ee waxbarashada kale.
- Bernadette Manning, Cambridge oo deegaan ah iyo macalin Boston Day iyo Evening Academy (BDEA) ayaa ka marag kacay taageerada ilaalinta goobta dugsiga ee Timilty building.
- Norma Suarez Quiles, Roxbury oo deegaan ah iyo waalid BDEA iyo xubin ka tirsan golaha boodhka, ayaa ka marag kacay ilaalinta goobta dugsiga ee Timilty building.
- Shakeeda Bartee, Dorchester oo deegaan ah iyo macalin BPS iyo waalid ah, ayaa ka marag kacay bixinta cadaalda dugsiyada.
- Sean Barrett, South Boston oo deegaan ah iyo waalid Perry Elementary School ayaa ka marag kacay kor u qaadista mudada iyo kordhinta Horumarka Dhammaan.
- Deirdre Baugh, Dorchester oo deegaan ah iyo macalin UP Academy Boston kana marag kacay cadaalada dugsiyada.
- Mary Lee Marra, Hyde Park oo deegaan ah una olaleeya bulshada, ayaa ka marag kacay una mahadceliyey Kormeeraha guud Cassellius.
- Fran Brangman, Dorchester oo deegaan ah una olaleeya bulshada, ayaa ka marag kacay siyaasada hawlaha bulshada ee lagu magacaabay, “Hadalka Dhabta ee Isbadelka.”

### Waxyaabaha Waxqabadka

Mr. Cardet-Hernandez ayaa xoojiyey muhiimada waadix ahaanta oo adkeeyey faaladiisii hore ee iskudarka casharada la bartay lagu daro heshiiska shaqaaleysiinta kormeeraha guud ee xiga.

**Ansixiyey** - Wicitaan, Gudiga ayaa u codeeyey ansixinta Gudoomiyaha Gudiga Dugsiga si loo saxeexo heshiiska kalasaarida ee Kormeeraha Guud Brenda Cassellius iyadoo loo eegayo heshiisyada lagu sharxay Maarj 2, 2022 kulanka Gudiga Dugsiga.

Ms. Lopera ayaa ku dhawaaqday in ka dib wadatashi lala sameeyey Lataliye Sharci oo BPS ah iyo Komishanka Anshaxa Gobolka, inay sameysay foomka qoraalka ee Magaalada Boston si wax looga qabto khilaafkasta oo danaha ah soona baxa kuna saleysan u olaleynta shaqaaleysiiyaheeda hada oo ku lug yeelan kara madaamoo ay la xiriirto raadinta kormeeraha guud, iyo sidoo kale xaalada shaqaaleysiiyahada hada oo xubinka ah BESe, iyo in wax laga qabto khilaafkasta oo khuseeya qandaraaska shaqaaleysiiyaheeda hada ee dugsiyada Boston Public schools. Waxay xaqiijisay in ay dhexdhexaad ka noqon doonto oo ay fulin doonto waajibaadkeeda Gudi Raadin ahaan iyo xubin Gudiga Dugsiga ahaan si loo wareysto loona xulo tartamaha kormeeraha guud.

**Kulanka fog araga ee Guddiga Dugsiga Boston**  
**Zoom**

**03/02/2022**

Mr. Tran waxay weydiisay in Gudiga Dugsigu heli karaan liisa su'aalaha loosoo gudbiyey tartamayaasha iyo sidoo kale macluumaadka tartamaha. Mr. O'Neill ayaa sharxay baahida asturnaanta wareegyada hore ee wareysiga, isagoo ku daray in Gudiga Raadintu siin doonaan warbixino joogto ah Gudiga Dugsiga. Mr. Tran ayaa ka hadlay muhiimada isku dheelitirka asturnaanta hawlgalka bulshada.

Mr. Cardet-Hernandez ayaa taxliiqiyey muhiimada siinta fursadaha bulshada.

**Ansixiyey** - wicitaanka, Gudiga ayaa u codeeyey inay ansixiyaan xubinamada iyo masuulka Gudiga Raadinta Kormeeraha Guud oo dejiyey Gudoomiyaha Maarij 2, 2022 qoraalka Gudiga Dugsiga. Ms. Lopera and Ms. Polanco-Garcia way ka aamustay. Dhammaan xubnaha kale waxay u codeeyeen haa.

**GANACSI CUSUB**

Ms. Lopera ku amaantay Ms. Mercer dhameystirka barnaamijka carbiska shaqo ee Warren-Prescott K-8 School intii lagu jiray Febraayo.

**KA XIRIDA**

Abaaro 8:22 p.m., Guddigu waxay si aqlabiyad ah ugu codeeyeen, yeeritaan ahaan, in la hakiyo shirka.

Attest:



Elizabeth Sullivan  
Xoghayaha fulinta